

# Baadhitaan Ultraljud iyo tijaabo dhiig iskugu jira (Kombinerat ultraljud och blodprov ama KUB)

## Maxaa KUB da loo sameeyaa?

Baadhitaanku waa hab lagu ogaanaayo itimaalka in uurkujir caloosha ku jiraa ay qabto cudurka Down's syndrome iyo laba isbeddel koromasoomada ah oo kale oo aan caadi aheyn.

Waxa qeyb ahaan la qaadayaa tijaabo dhiig ah oo cabbireysa qaar ka mid ah hormoonada xiliga uurka la helo, qeyb ahaana waxa la maraa baadhitaan ultraljudka ah oo gaar ah. Tijaabada dhiigga waxa la qaadi karaa todobaadka 9aad ee uurka iyadoo baadhitaanka ultraljudka la sameeyo toddobaadyada 11-14.

Waxa iyadoo la isticmaalaayo natiijada tijaabada dhiigga, baadhitaanka ultraljud ka iyo da'da gabadha, ay suurtagal tahay in la qiimeeyo itimaalka in uurjiifta caloosha ku jiro ay leedahay mid ka mid ah isbadaladaas koromosoomyada.

## Sidee ayaa baadhitaanka loo sameeyaa?

Tijaabad dhiiga waxa la qaadaa iyadoo suxulka lagaa duraayo. Baadhitaanka waa in la soo gudbiyo ugu yaraan hal toddobaad kahor intaan la qaadin baadhitaanka ultraljudka si jawaabta si dhaqso ah loogu bixiyo. Baadhitaanka ultraljudka waxa badanaa laga sameeyaa caloosha dusheeda iyadoo umulisada ama dhakhtarku uu qiyaaso uurjiifta qoorteeda. Waxaanu sidoo kale kantaroolnaa muddada uurka.

## Jawaabta

Waxa jawaabta natiijada lagu siin doonaa isla marka baadhitaanka la sameeyo ka dib. Haddii itimaalka lagu helaayo isbedelka koromosoomka ee uurjiiftu uu ka weyn yahay 1:51 ayaa waxa suurtagal ah in la sameeyo tijaabinta madheerta ama tijaabada biyaha uurjiifta taas oo markaa bixin doonta jawaab sax ah oo ku saabsan koromosoomyadaas. Marka itimaalka u dhaxeeya 1:51 ilaa 1:1000, waxaa suurtagal ah in la qaado NIPT (Non Invasiv Prenatal Test), taas oo ah tijaabo dhiig oo hooyada laga qaado. Haddii baadhitaankaa uu muujiyo isbeddello koromosoomyada ah, waa in lagu xaqiijiyaa baadhitaanka madheerta ama tijaabada biyaha uurjiifta.

Lamaanahaaga ama qof kale oo qaraabada kale ee kugu dhow dhow ah ayay wanaagsan tahay inay kula joogaan xiliga baadhitaanka. Natiijada ugu fiican

waxa la helaa marka deganaansho iyo xasillooni la helo xilliga baadhitaanka la sameynaayo, sidaas awgeed ayaan carruurta loogu ogoleyn inay joogaan.

**Wax dheeraad ah ka akhri**

<https://www.1177.se/Kronoberg/Tema/Att-vanta-och-foda-barn-i-Kronoberg/Att-vanta-barn/Undersokningar/>

Halkan waxa ku jira macluumaad dheeraad ah iyo xataa filim ku sabsan baadhitaanka uurjiifta (lagu turjumey Carabi, Ingriisi, Isbaanish).